Isbeddellada Guud ee ugu Muhiimsan

Toddobaadka gudihiiisa, waxaa dib loo furey 10 ka mid ah 16kii jiko ee cuntada karsan lagu bixinayay ee muddo bil ka badan u xirnaa dagaallada xooggan ee magaalada ka socdey. Celcelis ahaan 80,000 oo dad nugal ah oo maalin kasta ka faa'iideysanayey jikooyinkaas ayaa uu xiritaankoodu saameeyey. Xafiiska WFP ee magaalada Baladweyne ee gobolka Hiiraan ayaa sidoo kale dib loo furey ka dib markii la xirey 18kii Juunyo markii halkaa qarax bam uu ku diley ugu yaraan 24 qof. Arrintan ayaa xoojineysa waxqabadyada cuntada gargaarka ah ee bartamaha Soomaaliya halkaas oo in ka badan 930,000 oo qof ay ka faa'iideysanayaan cuntada gargaarka ah.

UNHCR ayaa sheegtey in ilaa 12,000 oo qof ay soo gaareen ayna ka sameysteen degaan ku-meel-gaar ah magaalada Boosaaso ee Puntland. Badi dadkaasi ayaa sugaya fursaddii ay ku geli lahaayeen safarka halista ah ee ay Gacanka Cadmeen uga gudbaan dalka Yaman iyaga oo raadinaya nolol tooda dhaanta. Hadda oo lagu jiro bad-xirankii dabaylaha maansuunka ayaa ay baddu halis tahay; sidaa daraaddeedna badi dadku waxa ay ku sugayaan Boosaaso ilaa bisha Sebtembar markaas oo ay dabayluhu degi doonaan oo ay badduna furmi doonto. Ilaa bishii Jannaayo, ku dhowaad 30,000 oo muhaajiriin cusub ah ayaa lagu diiwaan-geliyey dalka Yaman.

Dagaalladii u dhexeeyey ciidamada dowladda iyo muqaawamada ayaa Muqdisho ka socdey toddobaadka dhexdiisa iyada oo ay ku dhinteen ugu yaraan 30 qof oo ayna ku dhaawacmeen in ka badan 90 kale. UNHCR waxa ay sheegtey in 152,000 oo qof ay ku barokacaan Muqdisho ilaa 1dii Juunyo, iyada oo 46,000 ay u dhaqaaqeen goobo kale oo isla magaalada ah, 39,000 waxa ay u dhaqaaqeen waddada Afgooye halka 67,000 ay aadeen meelo kale oo dalka ka mid ah. Ku dhowaad 11,000 ayaa barokacay ilaa toddobaadkii la soo dhaafey.

La-tashiyada laga yeelanayo Geeddi-socodka Codsiyada Iskujira (CAP) 2010 ee Soomaaliya loo sameynayo ayaa bilaabanaya bisha Agoosto. Aqoon isweydaarsiyada CAP ee gudaha ayaa ka dhici doona Hargeysa, Somaliland iyo Garowe, Puntland halka aqoon-is-weydaarsiga Koonfurta/Bartamaha Soomaaliyana loogu qaban doono Nayroobi nabadgelyo-xumada daraaddood. Aqoon isweydaarsiyadani waxa ay dib u eegi doonaan guulihii la gaarey 2009ka; waxa ay munaaqashoon doonaan baahiyaha jira iyo waxqabadyada 2010ka taas oo ku dhisan ku-qorsheynta xaaladaha dhici kara. Geeddi-socodka Codsiyada Iskujira (CAP) ayaa la qorsheeyey in dib loogu habeeyo gobol-gobol iyada oo degaan kasta la siinayo muhiimadahiisa istiraatiijiyadeed.

Waxqabadka

Toddobaadka gudihiisa, UNFPA oo uu la shaqeynayo NGO-ga degaanka ee COCO ayaa xirmooyinka nadaafadda u qaybisey 900 oo haween iyo rag barokacayaal ah oo ku kala nool saddexda Degaan ee Xerooyinka Dadka Gudaha Ku Barokacay ee Avazioni, Buulo Hanshooy iyo Xuseen Kulmiye ee magaalada Muqdisho. Xirmada nadaafaddu waxa ay ka kooban tahay saabuun, shukumaan/tuwaal, oomo, caafidhowr, go'yaasha sariirta, funaanado, shanlayaal, saliidda madaxa, iyo waxyaabo kale.

17 tuulo oo abaartu saameysey ee gobolka Sanaag ee waqooyiga ku yaalla, ayaa ururka *Action Aid* uu barnaamijyo lacag-cunto-ku-beddelo ugu bilaabey 510 qoys. Ururka *Mercy Corps* ayaa sidoo kale bilaabey barnaamij kaas la mid ah oo lagu gaarey 100 qoys oo ku kala nool shan tuulo oo ay abaartu saameysay oo ku yaalla Maroodi-jeex oo ah koonfurta magaalada Hargeysa ee Somaliland. Biyo-dhaamintii degdegga ahayd ayaa ka socota gobollada Sanaag, Nugaal iyo Bari taas oo lagu gaarey 30,000 oo bulshooyin xoolo-dhaqato, reer miyi iyo magaalaba isugu jira oo ay saameysey abuurta iyada oo loo sii marinayo NGO-yada Vetaid, Muslim Aid iyo Horn Relief.

Toddobaadka dhexdiisa, iyada oo taageero laga helayo UNICEF, ayaa barnaamij quudinta dheeriga ah laga bilaabey xerooyinka Dadka Gudaha Ku Barokacay ee magaalada Gaalkacyo ee gobolka Mudug. In ka badan 800 oo carruur ah ayaa lagu aqbaley barnaamijka, 40 kale ayaana la gudbiyey si looga daweeyo nafaqo-xumo ba'an.

Degmada Jilib ee gobolka Jubadda Dhexe, ayaa Mercy USA ay 217 metrik ton oo cunto ah u qaybisey 2,166 ka-faa'iideystayaal ah.

Toddobadka dhexdiisa, WFP waxa ay Soomaaliya ka sameysay cunto qaybin dhowr ah (eeg shaxda hoose):

Goobta	Barnaamijka	Tirada ka-faa'iideystayaasha	Inta Metrik ton
Gobollada Hargeysa, Awdal, Togdheer, Sanaag iyo Sool ee Somaliland	Cunto-shaqo-ku-beddelasho & Quudinta Hay'adaha	15,490	1,980
Boosaaso, Puntland	Cunto-qaybinta Guud	3,102	295
Burtinle, Gobolka Nugaal	Quudinta Guud ee Dheeriga ah	21,100	182
Gaalkacyo, gobolka Mudug	Quudinta Dheeriga ah ee la Beegsado	24,240	408
Degmooyinka Qardho & Iskushuban ee gobolka Bari iyo degmada Eyl, ee gobolka Nugaal.	Cunto tababar ku beddelasho	16,740	230

La soo xiriir: Faahfaahinta dheeriga ah ee afka Ingiriisiga, kala soo xiriir: Rita Maingi +254 734 800 120 – maingir@un.org. Af-Soomaaliga ama Ingiriisiga, kala soo xiriir Muna Maxamed + 254 733 643 737 – mohamed26@un.org